



Australian Government



ParentsNext

# Participation Plan (Qorshaha ka Qaybgalka)

Participation Plan kan waxaa ku jira balamo iyo waxqabadyo oo iga caawin doona fulinta ujeedooyinkayga shaqo ee mustaqbalka.

Haddii aanan tegi karin balan ama waxqabad, waxaan ogolahay inaan la xiriiro adeeg bixiyahayga ParentsNext ka hor balanta ama waxqabadka qorshaysan inay dhacaan.

Waxaan faham sanahay inaan codsan karo in Participation Plan kayga dib loo eego wakhti kasta si uu u muujiyo wixii is bedel kasta ah ee noloshayda ku saabsan.

**Dhammaan jawaabaha waa in lagu bixiyaa Ingiriis.**

**Magac:**

**JSID:**

**CRN:**

---

**Ujeedo (oyinka)** - kuwani waa ujeedooyinkayga shaqo.

**Waxqabadyada iyo Balamaha** - waxqabadyada iyo balamaha ku jira qorshahan waxay iga caawin doonaan inaan gaaro ujeed-kayga/ooyinkayga

<b>Magac:</b>	<b>Faahfaahinta Bixiyaha:</b> ParentsNext:
<b>Saxiix:</b>	<b>Saxiix:</b>
<b>Taariikh:</b>	<b>Taariikh:</b>

# Macluumaadka aad u baahan tahay inaad ogaatid

## Wax ku saabsan Participation Plan kaaga

Ka qabyalayaasha ParentsNext badanaa waxaa looga baahan yahay inay galaan Participation Plan si uu uga caawiyo inay qorsheeyaan oo u diyaargarobaan shaqo.

Participation Plan kaagu wuxuu qorayaa waxqabadka adiga iyo adeeg bixiyahaaga ParentsNext aad isku raacdeen inaad sameyn doontaan si uu kaaga caawiyo fulinta ujeedooyinkaaga shaqo ee mustaqbalka.

## Maxaan sameeyaa haddii aanan sameyn karin waxyaalihii aan ogolaaday?

Haddii aadan sameyn karin waxqabad ku jira Participation Plan kaaga, ama aadan tegi karin balan, la xiriir adeeg bixiyaagaaga ParentsNext sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah, adeeg bixiyahaaga ParentsNext waxaa laga yaabaa inuu kuu sameeyo wakhti kale oo aad ku timaado balantaada ama waxqabadkaaga.

Haddii aadan tegin laba balamood oo iskuxiga, saxiixin Participation Plan kaaga ama ka qaybgelin waxqabad aad ogolaatay adoon heysan sabab ku haboon, adeeg bixiyahaaga ParentsNext waxaa laga yaabaa inuu kaa saaro ParentsNext.

Fadlan ogow ka qaybgalkaaga ikhtiyaariga ah ee ParentsNext ma saameyn doono wax ah lacagta taageerada dakhliga ee laga yaabo inaad hesho.

## Haddii aan diido go'aanka la gaaray maxaa dhacaya?

Haddii aad diido go'aanka adeeg bixiyahaaga ParentsNext uu ka gaaray Participation Plan kaaga, ama aad saluugsan tahay wax ku saabsan adeega aad heshay, waxaad kala hadli kartaa waxaad saluugsan tahay adeeg bixiyahaaga ParentsNext ama kala xiriir Department of Employment, Skills, Small and Family Business National Customer Service Line ee 1800 805 260.

Haddii aadan ku qancin jawaabtaad heshay, waxaa laga yaabaa inaad arinta hore u sii wado adoo kala xiriiraya Commonwealth Ombudsman 1300 362 072.

## Arimaha gaarka ah

Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa ilaaliyey sharciga, oo ku jiro *Privacy Act 1988 (Xeerka Arimaha gaarka ah ee 1988)*. Waxaa la ururin karaa oo kaliya, la isticmaali kartaa ama la bixin karaa meeshii aad ogolaansho bixisid adigu, ama meeshii sharcigu ogol yahay.

Waxaan ku siiney macluumaad gaar ah oo muhiim ah oo ku saabsan ururinta, isticmaalka iyo bixinta macluumaadkaaga shakhsiyeed. Macluumaad intaas ka badan waxaa laga helayaa:

- [www.employment.gov.au/privacy](http://www.employment.gov.au/privacy)
- bixiyahaaga
- Services Australia
- Office of the Australian Information Commissioner ee [www.oaic.gov.au](http://www.oaic.gov.au)

Waa muhiim inaad hubisid inaad akhrisid oo aad fahamtid macluumaadkan.